



Booliska Finland

Hawsha boolisku waa ilaalinta nidaamka guud iyo nabadgelyada, iyo ka hortagga dembiyada, baaridooda iyo u gudbinta xeerilaaliyaha. Waxaa kaloo intaas dheer oo uu boolisku u xilsaaran yahay adeegyada bixinta ogolaansha (lupapalvelut) iyo alaabta dhuntay ee la helay.

Habka shaqada ee boolisku iyo waxyaabaha ay tahay inay dhowraan waxay sida caadiga ah ku cad yihiin sharciyada booliska (poliisilait), sharciga isticimaalidda awoodda khasabka ah (pakkokeinolait) iyo sharciyada dembi baaridda hore (esitutkintalait).





Boolisku wuu adeegaa

Boolisku macaamiishiisa waddanka oo dhan wuu u adeegaa. Meelaha kala duwan ee shaqada boolisku ka jirtaa waa qiyaastii 280. Meelahaas qaar ka mid ahi waa saldhigyo boolis oo afar iyo labaatanka saacba dad shaqaale ahi joogaan, meelaha qaarkoodna waa goobo adeeg oo dhawr qof oo shaqaale ahi joogaan. Meelaha boolisku leeyahay mooyee waxaa kaloo jira meelaha adeegyada bixinta ogolaanshaha, waana qiyaastii 50 meelood oo ah meelaha ay boolisku si wadajir ah hay'adaha kale dadka ugu wada adeegaan.





10022 – lambarka booliska ee gargaarka degdegga ah

Markaad si degdeg ah caawimo ugu baahan tahay, wac lambarka tooska ah ee booliska ee gargaarka degdegga ah 10022 ama lambarka guud ee gargaarka degdegga ah 112.

Booliska waxaad danahaaga uga dhammaysan kartaa adigoo shakhsi ahaan ugu imaanaya, ama telefoon u soo diraya amaba adigoo internetka isticimaalaya.





Nidaamka guud iyo nabadgelyada

Boolisku waxay ilaaliyaan nidaamka guud ee meelaha babliga ah iyo nabadgelyadoodaba, iyagoo waardiyeeya, qabta hawsha degdegga ah ee loo soo gudbiyo, waxay ilaaliyaan nidaamka munaasabadaha waaweyn ee dadka badani isugu yimaadaan, iyagoo dadka la taliya haga, wixii sharci darro ahna joojiya.





Baaridda dembiyada

Sida caadiga ah baaridda hore ee dacwada waxaa u xilsaaran saldhigga booliska ee meesha dembigu ka dhacay. Iyadoo sidaasi jirto, haddana dacwada dembiga waxaa meel kasta ayaa la geyn karaa. Saldhigga booliska ee dacwada dembiga loo geeyey ayaa u gudbinaya meesha saxda ah ee dembiga lagu baarayo.

Boolisku wuxuu bilaabayaa baaridda dacwada, haddii ay jiraan sababo muujinaya inay suuragal tahay in dembi dhacay. Dacwooyinka dembiga ee la soo gudbiyo oo dhammi, ma sababaan in dembi baarid la sameeyo.

Baaridda dembiyada mooyee, boolisku wuxuu u xilsaaran yahay baaritaanno kale, oo ay ka mid yihiin baaridda sababta qof u dhintay, raadinta dadka la waayey iyo baaridda saameysa ka joojinta ganacsiga.





Adeegyada bixinta ogolaanshaha

Adeegyada bixinta ogolaanshaha ee booliska waxaa u xilsaaran booliska degmadaas. Baasaboorada, teesarayaasha aqoonsiga, laysanka wadida gaadiidka, sharciyada dadka ajnebiga ahi waddanka ku joogaan iyo bixinta ogolaanshaha hubka la rido ayaa waxay yihiin waxyaabaha ugu badan ee ah ogolaanshaha uu boolisku bixiyo. Arrimaha ogolaanshaha noocan ah la xiriira dartood, waa inuu qofku ugu yaraan hal mar shakhsi ahaan u tagaan saldhigga booliska, si boolisku u aqoonsado qofka ogolaanshaha soo dalbaday. Ogolaanshaha lacag ayaa layska qaadaa.

Waddanka dibediisa, sharciga joogidda waddanka, sharciga shaqada iyo fiisaha codsiyadooda waxaa la geynayaa safaaradda ama wakiilka Finland ee meeshaas.





Ilaalinta gaadiidka

Ilaalinta gaadiidka ee boolisku waxay ku jihaysan tahay ilaalinta xawaaraha, ilaalinta waxyaabaha maanka dooriya iyo ilaalinta isticimaalka qalabka nabadgelyada iyo weliba darawalada khatarta ah. Hawsha boolisku waa inay wax ka qabtaan waxyaabaha kale iyo hab dhaqanka jebinaya kana soo horjeeda xeerarka wadooyinka.

Booliska degmadu wuxuu caadi ahaan ilaaliyaa wadooyinka magaalada dhexdeeda, booliska wadooyinkuna (liikkuva poliisi) wuxuu ilaaliyaa wadooyinka waaweyn ee magaalooyinka isku xira.





Alaabta la helay

Alaabta la helo waa in qofkii iska lahaa loo sheegaa ama booliska loo keenaa. Waxyaabaha keesashadoodu ama haysashadoodu ay sharci ahaan mabnuuca yihiin ama u baahan ogolaansho shaqaalaha maamulka laga haysto, tusaale ahaan daroogada, khamri iyo hub sharci darro ah, waa in si degdeg ah booliska loogu geeyaa.

Qofka alaabta la helay iska leh wuxuu xaq u leeyahay, in alaabtiisa la siiyo, haddii uu qofka alaabta helay siiyo abaalmarinta helidda, uuna u gudo kharashka kaga baxay alaabta helitaankeeda.

Haddii saddex bilood gudohood uu qofka alaabta la helay iska leh booliska alaabtiisa kaga qaadan waayo, alaabta waxaa lagu wareejinayaa qofkii helay, waxaase jira marar aan lagu wareejin. Haddii qofka alaabta helay uu saddex bilood gudohood alaabta lagu wareejiyey ku qaadan waayo, alaabta la helay dowladda ayaa la wareegaysa.





Orgaaniseyshanka

Orgaaniseyshanka boolisku waa saddex jaranjaro. Maamulka ugu sareeya ee boolisku waa wasaaradda arrimaha gudaha waaxdeeda booliska. Waxaana hoos yimaada madaxda booliska gobolada, unugyada qaranka booliska, macadada waxbarashada booliska, xarunta farsamada ee booliska, xarunta maamulka wadooyinka ee booliska iyo shaqo ahaan saldhiga booliska ee Helsinki.



Waxqabadka booliska ee degnmooyinku waxay hoostagaan deegaanadooda (kihlakunta). Saldhigyada booliska ee deegaanadu waxay hoos yimaadaan madaxda booliska ee gobolkaas.



Faahfaahin dheeraad ah

www.poliisi.fi

www.polis.fi

www.police.fi

Booliska Finland

